# Ka ilaalinta guryaha iyo ganacsiyada abaarta iyo daadadka

Maarso 27, 2025 Su’aalaha warbaahinta

Alberta waxay ku maalgalinaysaa in ka badan $19 milyan oo Miisaaniyadda 2025 kamid ah, haddii la meelmariyo, si ay gacan uga gaysato in qoysaska iyo ganacsiyada laga ilaaliyo daadadka iyo abaaraha mustaqbalka dhici kara.

Sannadihii ugu danbeeyay, abaarta iyo daadadka waxaa laga dareemay gobolka oo dhan, in la dhiso kaabeyaasha lagama maarmaanka u ah ee loo baahan yahay si loo ilaaliyo dadka reer Alberta waxay qiime badan ugu kacaysaa inta badan dowladaha hoose. Taasina waa sababta dowladda Alberta ay ugu maalgalinayso in ka badan $19 milyan 10 mashruuc oo kala duwan ayada oo sii marinaysa Drought and Flood Protection Program (Barnaamijka Kahortagga Abaarta iyo Daadka) si loo ilaaliyo guryaha, loo difaaco ganacsiyada iyo, ugu dambayntiina, loo badbaadiyo nolosha.

10-kan mashruuc waxay gacan ka gaysan doonaan inay ka ilaaliyaan kaabeyaasha muhiimka ah daadka, ayada oo la kordhinayo kaydka biyaha si loo yareeyo saamaynta abaarta loona dhiso mashaariicda kale ee muhiimka u ah gobolka oo dhan.

“Dadka reer Alberta waxay indhahooda ku arkeen saamaynta ay fatahaadaha iyo abaaruhu ku yeelan karaan bulshooyinkeenna iyo hab-nololeedkeenna. Maalgalintan waxay bulshada ka caawinaysaa in la dhiso mashaariicda dabargoynta daadadka iyo abaaraha ee jiilka soo socda. Inkastoo oo aan badali karin cimilada, waxaan gacan ka gaysan karnaa ilaalinta qoysaska, ganacsiyada iyo bulshada sannadaha soo socda.”

Kala Soocidda: Dadweynaha

*Rebecca Schulz, Wasiirka Bay'ada iyo Goobaha la Ilaaliyo*

Maalgalintaanu waxay ka caawin doonta sideed dowladaha hoose iyo laba qolo oo dadka asalka ah(First Nations) dhisida mashaariicda loogu tala galay in guryaha iyo ganacsiyada looga dhigo kuwo qalalan, xaqiijinta in kaabeyaasha muhiimka ah ahaadaan kuwo shaqaynaya xiliyada ay jiraan xaaladaha degdega ah iyo ilaalinta helitaanka biyo ee la isku halayn karo. Tani waxaa kamid ah hagaajinta masalaxada bulshada sida:

- Dhisidda darbi haynta si loo ilaaliyo Gegida Diyaaradaha ee Slave Lake iyo Saldhigga Helitack inta lagu jiro daadadka.
- Dhisidda biyo celin ammaan ah si loo ilaaliyo Washington Sewage Lagoon ee Siksika Nation oo dhawaan la dhisay iyo kaabeyaasha kale ee maxalliga ah.
- Dhisidda 300 mitir oo ilaalinta xeebta ah ee ku teedsan Webiga South Saskatchewan si loo ilaaliyo Warshada Dawaynta Biyaha wasakhda ah ee Medicine Hat (The Medicine Hat Wastewater Treatment Plant).
- Joojinta ciid-guurka Carrot Creek si ay gacan uga gaysato ilaalinta kaabeyaasha ku yaala St. Albert.
- Abuurista baraag lagu maareeyo daadadka biyaha dabiiciga ah ee St. Paul si loo yareeyo khataraha abaarta iyo hagaajinta tayada biyaha.
- Sare u qaadista difaacyada daadka ee aagga Calgary ayada oo lagu badalayo Landon Ditch nidaam si loo maareeyo biyaha daadka ah loona difaaco kaabeyaasha.

Dowladda Alberta waxay $125 milyan ku maalgalinaysaa shanta sanno ee soo socota Drought and Flood Protection Program (Barnaamijka Kahortagga Abaarta iyo Daadka), kaasoo haddaba natiijooyin muujinaya. Sannadkii lasoo dhaafay, dowladdu milyamaad u gaysay ismamaulada, magaalooyinka, caasimadaha iyo saaxiibada dadka Asalka ah si loogu dhiso mashaariicda kaabeyaasha, kuwaas oo hadda socda. Guud ahaan, in ka badan $50 milyan ayaa hadda lagu maalgaliyay 28 mashruuc ayada oo barnaamijkan la adeegsanayo.
Wareega xiga ee codsiga maalgalinta wuxuu furmi doonaa Oktoobar, ayada oo $25 milyan diyaar u tahay ilaalinta ganacsiyada, qoysaska iyo bulshooyinka.
Miisaaniyadda 2025 waxa ay buuxinaysaa caqabada soo food saartay Alberta iyada oo la sii wado maalgelinta waxbarashada iyo caafimaadka, ilaalinta deegaanka, cashuuraha hoose ee qoysaska iyo diiradda saaraya dhaqaalaha.

## Xaqiiqooyin kooban

- Maalgalinta dhammaanba mashaariicda lagu ogolaaday wareegaan waxaa la bixin doonaa 2025-26.
- 10-ka mashruuc ee helaya maalgalinta, todoba ayaa diiradda lagu saarayaa ka jawaabista koowaad ee daadadka, mid waxaa diirada lagu saarayaa ka jawaabista saamaynta abaarta labana waxaa diirada lagu saarayaa dabargoynta abaarta iyo daadadka labaduba.
- 18-ka mashruuc helitaanka maalgalinta wareega koowaad, 10 ayaa diirada lagu saarayaa ka jawaabista saamaynta abaarta.
- Wareega mid ka mid ah maalgelinta, $5,727,119 ayaa dib loo dhigay ilaa 2025-26, iyada oo $5 milyan la aadayo Dayactirka Kaabayaasha Biyo-bixinta ee Fort Mckay(Fort Mckay Water Supply Infrastructure) iyo $727,119 oo lagu maalgalinayo Mashruuca Weecinta ee Biyaha Daadadka ee Glenmore Trail(Glenmore Trail Stormwater Diversion Project).

## Macluumaadka la xiriira

- Drought and Flood Protection Program (Barnaamijka Kahortagga Abaarta iyo Daadka)
- Mashaariicda la meelmariyay

## Su'aalaha warbaahinta


### Ryan Fournier

780-232-2213
Xoghayaha Saxaafadda, Bay’ada iyo Dhulka la Ilaaliyo